

Deyn huban, caqliyeysan oo sahlan
Sideey u shaqeysaa?

Waxaad naga helaysaa deyn huban, caqliyeysan oo sahlan.

Waxaad noola kaalayeysaa shey rahan ah isla markiibana waxaad heleysaa lacag deyn ah. Inta ay la egtahay lacagta aad deysan karto waxey ku xiran tahay qiimaha sheyga. Qiyaastii 60% qiimaha qiimaha gacan labaadka ayaa caadi ah.

Maxaan wax ku deysan karaa?

Waxaad wax ku deysan kartaa wax kasta oo aan u aragno iney qiimo ka leeyihiin suuqa isla markaana laga xafidi karo golaheena. Waxey noqon karaan dahab, dhagxaan qaali ah, saacado, elektoronik, saxamada qaaliga ah, muraayado, qalab, qalin, kaamerooyin, farshaxan ama wax mar hore la sameeyey. Nala soo hadal si aan kuugu xugmino.

Mudo intee la eg ayaan qabi karaa deynta?

Deynta sida caadiga ah waxa loogu tala galay afar bilood. Wixii ka danbeeya waa inaad cusboonisiisaa adigoo wax keenaya. Markaa waxaad bixineysaa dulsaar waqtiga deynta iyadoo aad sii qabi karto deynto waqti hor leh. Ma rabtaa inaad soo celiso deynta, waxaad sameyn kartaa mar kasta ee waqtiga deynta ah. Waxaad bixineysaa uun deyntii iyo dulsaarka bisha bilaabatay.

Sharciga iyo xeerarka deynta

Waa sahal wax deynsiga. Waa inaad jirtaa 18 sano wadataaana aqoonsi shaqeynaya oo sawir leh markaad wax deysaneyso ama alaabta qaadaneyso. Warqada rahamka waa mid shaqsi oo laguma wareejin karo qof kale. Qof waa kuu soo dooni karaa alaabta haddii warbixinta warqada rahanka ay buuxdo isla markaana deyn qaataha iyo wakiilkaba la helo aqoonsigooda. Deynta waxa hoos timaada sharciga rahamka 1995:1000. Deynka ceymis ayuu ku jiraa marka loo eego sharciga uu waafaqsan yahay. Si loo yareeyo qatarta wax ku deynsashada alaabta la soo xaday waxan la shaqeynaa boliiska.

Waa imisa kharashka?

Dulsaarka deynka ilaa iyo 10.000 koroon waa 3,25% bishi (39% sanadki). Dulsaarka deynka wixi dheer 10.000 koroon waa 2,5% bishi (30% sanadki).

Tusaale: 1000 kr 32,50 kr/bishii

5000 kr 162,50 kr/bishii

10 000 kr 325 kr/bishii

20 000 kr 575 kr/bishii

Qarashka adeega oo 50 koroon ayaa soo raacaya. Dulsaarka bishi iyo bil kasta oo bilaabata waxa loo xisaabinaya mid buuxa.

Maxaa dhacaya haddii aanan deynki soo celin?

Qiyaastii 95%-kiiba way bixiyaan dadku deynta laakin haddii aadan bixin deyntaada waxaa lagu iibinayaa xaraash alaabtaada. Haddii lacagta xaraashka ka badato deynta laguugu leeyahay dabcan wixii soo hara adigaa iska leh.

Haddii aan rabo inaan wax iibsado?

Dhamaan alaabaha ka muuqda dariishada waa iib. Waxaan heynaa alaabo badan sida dahab, dhagxaan qaali ah, saacado, farshaxan, wax mar hore la sameeyey iyo kaarbetyo asli ah. Badanaan qiimaha ayaa ah ku ugu raqiisigan magaalada.

Wax kastana waa asli:

Xataa qiimaheena.